

**Puntland Non-State  
Actors' Association**



**Dallada Daneeyayaasha aan  
Dawlga Ahayn ee Puntland**

**War-saxaafadeed  
Taariikh: 27 December, 2019**

Dalladda Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSA) waxa ay walaac ka muujineysaa qaabka ay u socoto doorashada heer federaal ee 2020/2021.

- Siyaasiyiinta soomaalidu waxay ku heshiiyeen Abriil 2016 in laga guuro nidaamka qabaliga ku salaysan ee 4.5 loona guuro doorasho qof iyo cod ah marka la gaaro sanadka 2020/2021.
- Sharcigan cusub ee doorashooyinku wuxuu isu keenayaa doorasho ku salaysan nidaamka 4.5 iyo doorasho qof iyo cod ku salaysan oo aan is waafaqi karayn
- Nidaam kasta oo aan laga heshiin wuxuu keeni karaa xasilloonni darro
- Sharcigani wuxuu dhiirri-gelinayaa inay samaysaan xisbiyo ku salaysan qabaa'il

**Sidaas daraadeed:**

Dalladda bulshada rayidka ah ee Puntland (PUNSA) waxay soo jeedinaysaa qodobadan hoose:

- In doorasha 2020/2021 looga heshiiyo si wada oggol ah
- Inaysan doorashada 2020/2021 uga darin dadka iyo dalka abuurinna xasilloonni darro
- In la xoojiyo ka qayb-galka doorashada ee haweenka iyo dhallinyarada
- Inay muwaadiniinta soomaaliyeed ay helaan xaqa ay u leeyihiin inay wax dooran karaan lana dooran karo
- In muwaadiniinta soomaaliyeed codkooda la maqlo oo ay soo bandhigaan fikradaha ay ka qabaan arrinta doorashadan 2020/2021 oo ah mustaqbalkooda

Faysal Axmed Warsame

**Guddoomiyaha Bulshada Rayidka ah ee PUNSA**

